

# ADEEGA DIAL-A-RIDE



## Adeegyada loogu talagalay dadka naafada ah

Dial-a-Ride waa adeeg la raaco oo loogu talagalay dadka naafada ah ee aan awoodin inay raacaan basaska khadka joogtada ah ee u baahan adeega gacan-qabashada (door-through-door). Waxaa loo baahanyahay in adeegan la ballansado.

Dadka adeegan isticmaalayaa waa in ay maraan borosiis lagu hubinayo in ay xaq u leeyihiin ka hor inta ayna isticmaalin.

## SIDA LOO CODSADO

- 1) Arji kasoo qaado **ridemetrobus.com** ama soo wac **320.252.1010**. Wixii faahfaahin u gaar ah xaqiijinta u qalmitaanka waxaad ka helaysaa arjiga. Foomam loogu talagalay naafada ayaan haynaa hadaad dalbato.
- 2) Marka uu arjigaagu nasoo gaadho kadib, waraysi is arag ah ayaan kuu qaban doonaa. Waraysiga waxaa ku jiri kara qiimayn dhanka jirka am/ iyo garaadka ah.
- 3) Xaq u-yeelashada adeega Dial-a-Ride waa go'aan dhanka gaadiidka ah ku saabsan, balse aan caafimaad ku saabsanayn. Go'aan qaadashadu kuma salaysna in qofku nafo yahay, balse waxay ku salaysantahay saamaynta naafonimadaasi ku leedahay awoodda qofeed ee isticmaalka adeega basaska khadka joogtada ah. In qofku u maleeyo in ay raacida basaska khadka joogtada ah ay adag tahay, ama ay ku adagtahayba ka mid ma aha shuruudo uu qofku ugu qalmo.
- 4) In dib loo ansixiyo ayaa loo baahanahay 3dii sanoba mar.

**320.251.RIDE(7433)**

**ridemetrobus.com**

**METRO BUS**  
the people picker-uppers.



Metro Bus waxay howlgelisaa adeega baska ee St. Cloud, Sartell, Sauk Rapids & Waite Park.

## SAACADAHA ADEEGA

### Saacado u dhigma kuwa Basaska ku socda khadka joogtada ah

Adeega ku kabitaanka gaadiidka naafada ayaa laga heli karaa 3/4 (saddex meelood maylkiiba) mayl ee dhammaan wadooyinka khadka joogtada ah toddoba cishoba.

Adeega Dial-a-Ride wuxuu ku shaqeeyaa saacado u dhigma kuwa Basaska ku socda khadka joogtada ah. Goob kastaa saacado u gaar ah ayay leedahay.

Adeega basku ma jiro New Year's Day, Memorial Day, Independence Day, Labor Day, Thanksgiving Day, & Christmas Day. Wakhti hore ayaa la xidhaa habeenka Christmas soo galayo.

## KHARASKA BAS-RAACA

### Lacag kaash ah | Kaarka 10 Jeer Bas Lagu Raaco | Kaarka baska 31-cisho Lagu Raaco

Kaarka baska waxaa laga iibsan karaa internetka, Xarunta Metro Bus Transit Center ama dukaamada waaweyn badankood. Qofka bixiya Daryeelka Guriga (PCA) bilaash ayuu baska ku raaca, soo booqo [ridemetrobus.com](http://ridemetrobus.com)

## BARO SIDA LOO RAACO BASASKA KHADKA JOOGTADA AH KU SOCDA

Tababar bilaash ah ayaa loo hayaa qof kasta, sida dadka waayeelka ah, dadka naafada ah, iyo dadka Ingiriisiga kooban ku hadla.

**Xarunta Tababarka Mobility Training Center**  
**320.529.4497**